

Amarka L. 14. rep

Ka joojinta dabbaqidda tabarucadkii gaarka ah ee ku xusan qod. 23 iyo qod. 24 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ee Soomaaliya ka jira.

MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAMULAHA

Marka uu arkay Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee 9 Disember 1953, lamba. 2335;

Marku uu garowsaday habboonaanta in la joojiyo muddo laba sano ah dabbaqidda tabarucadka gaarka ee maxkamadda gobolka qaadi kartay sida ku cad qodobada 23 iyo 24 ee xeerka nidaamka garsoorka lagu meelmariyay r. d 20 jun 1953, lamba. 1638;

Marka uu arkay qod. 8 ee Heshiiska Ilaalinta Dhulka Soomaaliya;

Marka uu arkay qod. 4 ee mabadiida dastuuriga ee ku lifaaqan Heshiiska Ilaalinta;

Marka uu arkay qod. 4 ee Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee 9 Disember 1953, lamba. 2357.

WUXUU AMAR KU BIXINAYAA

Qod. 1

Muddo laba sano oo ka bilaabata marka amarkan uu dhaqangalo waxaa la joojyay dabbaqidda tabarucadkii gaarka ah ee ku xusan qod. 23 iyo 24 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka ee Soomaaliya ka jira.

Muqdisho, 2 Agoosto 1954

Maamulaha

Martino